**XEERKA N. 181 rep.**

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMALIA

## XOGHAYAHA GUUD

MARKUU ARKAY sharciga lambar 4 soona baxay nobembar 1951, n. 1031, kaas oo ansaxinaya heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA oo siiyanaya awood fulineed oo buuxda;

MARKI UU ARKAY XEER n. 115 soona baxday 14 kii setembar 1951, taasoo lagu asaasay Dugsiga kalkaaliyayaasha cafimaadka, iyo ansixinta nadaamka la xiriira;

MARKI UU ARKAY wreegto n. 44 soona baxday 5 maarso 1952, kaas oo wax ka beddelayo Nadaamka Dugsiga kor lagu xusay;

MARKI UU TIXGELIYEY baahida loo qabo in la beddelo magaca Dugsiga kalkaaliyayaasha cafimaadka, iyo qawaaniinta la xiriirto, iyada oo la eegayo khibradda laga helay sannadkii koowaad ee shaqadiisa, iyo ula jeeddo ah in lagu kordhiyo hawlaha iskubuuxinta barnaamijka horumarinta ee waxbarid xirfadeedka caafimaadka oo uu diyaariyey Xafiiska cafimaadka ee awoodda u leh;

MARKI UU DHEGEYSTAY soo jeedinta Golaha Caafimaadka, eek u dhisan nadaamka n. 12 ee 30 kii juunyo 1951;

MARKI UU ARKAY qodobka 2 ee nadaam n. 47 ee 1950 kaas oo siinayo Xoghayaha Guud qabashada shaqooyinka loo igmaday Maareeyaha marka uu maqanyahay;

### WUXUU XEEREYNAYAA

### Qod. 1.

Dugsi xirfadleyaal loogu talagalay kalkaaliyayaasha caafimaadka ee degaanka, laguna magacaabo "Dugsiga Hoose Caafimaadka", ayaa laga asaasay magaalada Muqdishu, Isbitaalka Martiini si loo wanaajiyo farsamada iyo dhaqanka diyaarinta shaqaalaha daryeelka kaabayaasha ah, isla markaana awood u siinaya inay gutaan waajibaadkooda si karti, dareen iyo mas'uuliyad leh, xitaa dhanka daaweynta ee bukaan socod eegtooyinka iyo bukaan eegtooyinka yar yar ee meelaha fog ku yaala.

### Qod. 2.

Waxa la ansixiyey Nadaamka ku lifaaqan kaas oo dhowraya anshaxa shaqada Dugsiga kor ku xusan.

### Qod. 3.

Dowrooyinka “Dugsiga Hoose Cafimaadka” waxa ay billaaban kowda jannayo 1953.

**Qod. 4.**

Wareegtooyinka n. 115 iyo n. 44 ee ku xusan dhismayaasha, waa la joojiyaa marka la gaaro xiritaanka dowrada koowaad iyo dhameystirka imtixaannada la xariira.

**Qod. 5.**

Kharashaadka la xirira waxa la saarayaa cutubka 63 ee sannad maaliyadeedka socda, iyo cutubyada u dhigama ee sannadaha xiga.

Muqdisho, 29 nofembar 1952.

XOGHAYAHA GUUD
**Canino**

Arkay diiwaangelinta n. 911 ee R. D.
4 diseembar 1952.

---

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMALIA

## NADAAMKA "DUGSIGA HOOSE EE CAFIMAADKA"

**Qod. 1.**

Dusiga Hoose ee Cafimaadka aya ku yaala Muqdisho, Isbitaalka Martini dhexdiisa.
Agaasimaha isbitaalka ayaa mas'uul ka ah maamulka dugsiga.

**Qod. 2.**

Dugsigu waa laba sannadle waxana loo qaybiyaa laba dowradood, midkasta aysoconeyso ku dhwaad 9 bilood, ayna xigeyso 3 bil fasax ah.

Dowrooyinku waxa ay billaaban billowga jannaayo waxa ayna dhammaadaan billowga oktoobar sannad walba.

**Qod. 3.**

Gelitanka Dugsiga waxa lagu ogolaadaa dalab, kuwa laga helo shuruudaha soo socda;

1. — Diboloomada dugsiga hoose, iyo ugu yaraan laba sano oo shaqo dhab ah.
2. — Warbixin wanaagsan oo uu ka heysto bixiyaha daryeelka caafimaad ee ay u shaqeeyeen: iyo inay ku habboon yihiin imtixaanka guud iyo u diyaarinta Guddi imtixaan kaas oo ka kooban: a) **Magaalada Muqdisho**: Kormeeraha Caafimaadka — Guddoomiye — Agaasimaha Isbitaalka Martiini iyo takhtar saddexaad oo uu magacaabay Xafiiska Caafimaadka. b) **xafiisyada kale ee Gobollada**: Kormeeraha Caafimadka — Guddoomoye — iyo takhtarka gobolka iyo takhtar kale, ama qof kale oo deggan oo awood ku leh.

**Qod. 4.**

Dowrooyinku waxa ay ka kooban yihiin casharro akhris ah iyo layli gaqcmeed, kaas oo sidoo kale ka dhici kara xarumo caafimaad oo kale, oo aan ahayn Isbitaalka Martiini.

Casharradu waxa la qaban si joogto ah galbihi, tiro guud oo saacado usbuuciina aan ka yareyn 10 kana badneyn 12.

Layliga gacan ka qabadka waxa lagu qaban qaybaha kala duwan ee isbitaalada, saacdo iyo hab uu dejiyo Maamulah Dugsiga iyo faham toosan oo la qaato, meeshii loo baahdo, iyadoo lala tashanayo Agaasimayaasha xarumaha kale ee caafimaadka.

**Qod. 5.**

Casharradu waxa ay diiradda saarayaan maaddooyinka soo socda:

1) **Sannadka Koowaad:**
   - a) — Qaybaha jirdhiska adamiga;
   - b) — Waxyaabaha ay ka kooban yihiin jirdhiska iyo cilmiga cudurrada;
   - c) — kalkaalinta iyo farsamada isbitaalka;
   - d) — Qaybaha nadaafadda iyo sheybaarka;
   - e) — Qaybaha farmashiga iyo daaweynta guud
   - f) — Maamulka, tirakoobka iyo dhaqanka guud.
2) **Sannadka labaad:**
   - a) — qaybaha cilmiga cudurrada iyo daaweynta;
   - b) — qaybta cilmiga cudurrada iyo daaweynta qalliinka;
   - c) — qaybta cilmiga xididdada;
   - d) — qaybta carruurta iyo cudurada dumarka iyo dhalmada;
   - e) — Takhasusyo gaar ah, ilkaha, qalliinka indhaha, dhegaha sanka iyo dhuunta, iwm;
   - f) — nadaafadda guud, dhismaha, caafimaadka xoolaha, dhaqanka guud, iyo farsamada isbitaalada.

**Qod. 6.**

Casharradu waxa ay u baxayaan sida uu saacadah u dejiyo Xafiiska Cafimaadka, soojeedinta Maamulha dugsiga kadib.

Macallim kasta qoraallada ku habboon ayaa loo diyaarin doonaa maado kasta.

**Qod. 7.**

U gudbidda dowrada koowaad ilaa tan labaad waxa ay ku imaan natiijada ka soo baxdo imtixaanka ay qaadaan Guddi ka kooban: Kormeeraha Caafimaadka – Guddoomiye_ Maamulaha Dugsiga iyo Macallimiinta maadooyinka dowrada koowaad.

Imtixaan ka la sheegay waxa uu ka kooban yahay, imtixaan qoraal ah, imtixaan afka ah maado kasta, iyo layli gacmeed.

**Qod. 8.**

Dhammaadka dowrada labaad waa waqti la qaado imtixaanka lagu bixiyo diboloomada " kaaliyaha Caafimaadka fasalka labaad" waxaana qabta Guddi uu XEER ku magacaabo Maareeyaha oo maqla soo jeedista Xafiiska Caafimaadka.

**Qod. 9.**

Imtixaannada Diboloomada waxa ay ka kooban yihiin laba imtixaan qoraal ah mowduucyo leh dabiicad farsamo xirfadeed oo ay doortaan Guddiga imtixaanka, iyo imtixaan afka ah iyo layli gacmeed maadooyinka la dhigo oo idil.

**Qod. 10.**

Darajada lagu saxo imtixaannada waa toban dhibcoodley ardayda hesha darajo aan ka yarayn 6 dhibcood imtixaan kasta, waxa ay helayaan ku habboonaan.

**Qod. 11.**

Imtixaannada waxa la qabtaa gudaha bisha oktoobar.

Jadwalka imtixaanka waxa diyaariyo kormeeraha Caafiumaadka kadib soo jeedinta maamulaha dowrada.

**Qod. 12.**

Ardayda ku dhaca waxa aan kabadnayn saddex imtixaan waa loo ogolaan karaa in ay ku soo celiyaan dowrada.

Loo ogolaan maayo Dugsiga arayda noqday kuwa dhacay laba sano oo isxiga.

**Qod. 13.**

Macallimiinta dhiga maadooyinka cafimaadka iyo xannaanada xoolaha ee Dugsiga waa in ay heystaan shahaaddada laawuriyada.

Masuuliyadda waxbaridda, ayaa sida caadiga ah socota hal sano, waxaana bixiya Maareeyaha, marka uu arko soo jeedinta kormeeraha caafimaadka.

**Qod. 14.**

Macallimiinta waxa la siiyaa qiyaas Sh. So. 12 saacad kasta oo wax tar leh ee ay cashar dhigaan. Xubnaha Guddiga imtixaanaadka waxa la siiyaa qiyas Sh. So. 5 arday kasta oo ay imtixaan ka qaadaan.

Macallimiinta waxa laga rabaa in ay warbixin kooban buuxiyaan oo bil bil ah, qorallada la sheegay waxa loo gudbiyaa Maamulaha Dugsiga kaas oo badin doona kadibna ardayda u qaybin doona.

**Qod. 15.**

Maamulaha Dugsiga ayaa loo magacaabi karaa inuu wax baro saacado aan ka badnayn labo usbuuciiba.

**Qod. 16.**

Kormeeridda Guud ee farsmad iyo edbinta ee Dugsiga waa qaadanaya Kormeeraha Caafimaadka kaas oo ansixiya barnaamijka waqxbaridda ee maaddooyinka kala duwan ee uu soo jeediyey maamulaha Dugsiga.

Muqdisho, 26 nofembar 1952.

XOGHAYAHA GUUD
**Canino**